

DIYAARINTA CASHUURTA OO BILAASH AH! LACAG-CELIN DHAKHSO AH!

HEL CASHUUR CELINTAADA



- Cashuur diyaariyeyaal shahaado ka qaatay IRS ayaa kuu heli doona dhamaan wixii aad shaqeysatay!
- Diyaarin cashuur oo bilaash ah haddii dakhligaagu uu yahay ama ka hooseeyo \$30,000 oo ah qof kali ah, ama \$50,000 oo ah qoys.
- Si aad u ogaatid u-banaanaanta gaar ah, soo wac United Way 2-1-1.

SI AAD U HESHID LIISKA GOOBAHA DIYAARINTA CASHUURTA OO BILAASH AH:

- **United Way 2-1-1**
Wac 2-1-1, ama telefonka gacanta ka wac 651-291-0211 (1-800-543-7709 oo ah dibadda aagga magaalada)
- **Wasaaradda Dakhliga ee Minnesota (Minnesota Department of Revenue)**
651-297-3724 ama 1-800-657-3989
- **Gudbinta Minnesota (Minnesota Relay) ee dadka maqalka ka dhibaateysan**
711 (TTY)
- **www.taxes.state.mn.us**
Raadi intaad ku qortid "free tax preparation sites" (goobo diyaarin cashuur oo bilaash ah)

DIYAARIN CASHUUR OO BILAASH AH Maxaan hore u soo qaataa?

WAXA LA RABO:

- Aqoonsi (ID) sawir leh
- Taariikh dhalasho iyo Kaadhka Sugidda Bulshada (Social Security Card) ama kaadhka Lambarka Aqoonsiga Cashuurta ee Qofka (Individual Tax Identification Number) (ITIN) ama warqad oo ah dhamaan dadka ku taxan cashuur celinta
- Cadeyn dakhli ama W2s oo ah shaqo kasta
- Dhamaan foomamka 1099 ee la helay
- Dakhliga dhamaadka sannadka ee MFIP, SSI, MSA, GA, anfacyada sooyaalka ciidanka, magdhowga shaqaalaha)

WAXYAABO DHEERAAD AH SI LOO DEDEJIYO ADEEGGA CASHUURTA:

- Cashuur celintii sannadkii hore
- Warka lacag-shubis toos ah (direct deposit): jeeg xariiq la mariyay ama lambarka jihaynta (routing) iyo lambarka xisaabta bangiga
- Rishiidhyada kharashyada waxbarasho ee ardayda kugu tiirsan min bilaw ilaa fasalka 12-aad (K-12) (oo ay ku jiraan alaabta dugsi, waxbarid gaar ah, casharada muusigga iyo farshaxanka)
- Kharashyada waxbarashada ee jaamacadda, koleejka ama koleejka farsamada (Form 1098-T)
- Cadeynta dulsaarka ee daymaha ardayda (Form 1098-E)
- Kharashyada sii-haynta ilmaha: magaca adeeg-bixiyaha, adreeska, Aqoonsiga Cashuurta (Tax ID) ama lambarka sugidda bulshada (Social Security number)
- Deeq-bixinno samofal
- Cadeymo mulkiile guri: cadeynta dulsaarka daynta guriga (mortgage interest), cashuuraha guri ee la bixiyay (Form 1098), Cadeynta Cashuurta Guri ee la Bixinayo (Property Tax) 2012
- Cadeymaha kireystaha: Cadeynta Kirada la Bixiyay

CALLWAC UNITED WAY 2-1-1 SI AAD U OGAATID GOOBO DIYAARIN CASHUUR OO BILAASH AH

Haddii aad ka soo wacaysid telefon gacan garaac 651-291-0211 (1-800-543-7709 oo ah dibadda aagga magaalada)

War dheeraad ah waxa laga heli karaa barta ah www.taxes.state.mn.us

Raadi intaad ku qortid "free tax preparation sites" (goobo diyaarin cashuur oo bilaash ah)

CLAIM it![™]

A COMMUNITY-WIDE PARTNERSHIP